# ARC oo qaadday olole ballaadhan oo ay ugu gurmanayso dadka abaaruhu waxyeelleeyeen



Eeg bogga 2aad>>

AFRICAN RELIEF COMMITTEE
A.R.C
لجنة أفريقيا للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE
أثـر .. يبقى

مسارات خيرية
CHARITABLE PATHS

جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'
(4PAGE) WED ,2 MARCH 2022 RAJAB 1443 Hargeisa-Somaliland

### Ardayda Kuweytiga oo salaad roob doon ah tukaday

300 oo arday oo ka tirsan dugsiyada hoose / dhexe ee xarunta Kuweytiga, macallimiintooda iyo hawlwadeennada kale ee dugsiyada ayaa salaad roobdoon ah ku tukaday dugsiga...

Eeg bogga 3aad>>

### Arday ka tirsan Kuweytiga oo helay ijaasada Qur'aanka iyo abaal marin

Arday ka tirsan Xarunta Kuweytiga oo helay ijaasada xiftiga Qur'aanka oo lagu maamuusay kaalinta uu ka galay tartanka Qur'aanka..

Eeg bogga 4aad>>

### Neef Lo' ah oo lagu xooleey ey qoys danyar ah, magaala da Jowhar

Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika, mudane Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa xarunta hay'adda ku soo dhoweeyey wafti ka tirsan golaha xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland.

Waftigan oo ka koobnaa..

Eeg bogga 4aad>>

### Tababar La Siiyey Beeraleyda Degmada Ceerigaabo Ee Jamhuuriyadda Somaliland

Eeg bogga 4aad>>

### Neef Lo' ah oo lagu xooleey ey qoys danyar ah, magaala da Jowhar

Hay'adda gargaarka Afrika ayaa mid ka mid ah qoysaska Saboolka ah ee degmada Jowhar ee caasimadda dawladgobaleedka Hirshabeelle waxa ay ku wareejisay hal neef oo lo' rimaan ah...

Eeg bogga 3aad>>

## Xarunta Kuweytiga oo dalka Kuweyt la damaashaaday maalinta qarannimadiisa

Eeg bogga 4aad>>



## Guddida kormeerka oo kulan ka yeeshay qandaraaska dhismaha cisbitaalka Caalamiga ah

Guddida loo xilsaaray kormeerka iyo la socoshada qandaraaska dhismaha cusub ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Harggeysa, ayaa yeeshay kulan ay ku gorfaynayaan qandaraaska dhismaha cusub ee cisbitaalka. Guddida ayaa kulankooda oo ka qabsoomay xarunta hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC, waxa ay daraasayn...

Eeg bogga 3aad>>

### Dhismaha deyrka xarunta Al-Amal ee magaalada Garoowe

Hay'adda ARC ayaa dhammaystirtay dhismaha deyrka ku wareegsan degsiimada Al-Amal ee xarunta waxbarashada samafalka a..

Eeg bogga 2aad>>

### ARC Waxa Ay Ka Qaybga shay Kulanka Heer Qaran Ee Gurmadka Abaaraha

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa mid ka mid ah qoysaska Saboolka ah ee degmada Jowhar ee caasimadda dawladgobaleedka Hirshabeelle waxa ay ku wareejisay hal neef oo lo' rimaan ah, kaas oo laga bixiyey samafale Marxuum Daariq...

Eeg bogga 2aad>>

### Carruur Loo Sameeyey Qalliino Faruurta Lagaga Baabi'inay

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa magaalada Muqdisho ka fulisay qalliino qurxin ah oo loo sameeyey 10 ka mid ah Carruurta faruuran ee qoysaskoodu danyarta yihiin.

Eeg bogga 2aad>>

### ARC Waxa Ay Qodday Ceelal Biyood Oo Ay Ka Faa'idaysteen In Ka Badan 1500 Oo Qof

Hay'adda ARC ayaa ku guulaysatay qodaalka shan ceel biyood oo ku yaalla deegaanno kala duwan oo ka mid ah badhtamaha iyo Koonfurta Soomaaliya.

Ceelashadan oo leh kaabayaal ay ka mid yihiin dararkii ay xooluhu ka cabbayaan iyo wiish gacmeed biyaha lagaga soo saarayo, waxaa laga qoday deegaanno ka ..

Eeg bogga 3aad>>

## ARC oo qaadday olole ballaadhan oo ay ugu gurmanayso dadka abaaruhu waxyeelleeyeen

Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa bilowday olole ay ugu gurmanayso dadka abaaruhu waxyeelleeyeen ee deegaannada kala duwan ee Somaliland iyo Soomaaliya. Siddeed baabuurta xamuulka ah oo sida raashin ku filan 900 oo qoys iyo soddon booyadood oo sida 300 oo kun oo litir oo biyo ah, ayaa ay hay'addu gaadhsiisay dadka ay dhibaatadu ka soo gaadhay abaaraha ee goballada Togdheer iyo Sool ee jamhuuriyadda Somaliland, iyo barakacayaal ku sugan magaalada Mudisho ee Soomaaliya.
Raashin ku filan 500 oo qoys iyo 10 booyadood oo biyo ah ayaa la siiyey dadka abaaruhu ku dhibaateeyeen gobalka Togdheer, gaar ahaan deegaannada hoos taga magaalada Burco. Halka raashin ku filan 150 qoys iyo toban booyadood oo biyo ahna ay hay'addu u qaybisay qoysaska deegaanka magaalada Caynaba ee gobalka Sool, 250 xidhmo oo raashin ah iyo 10 booyadood oo biyo ahna ay u qaybisay qoysas deggen deegaanka magaalada Laascaanood ee isla gobalkaas.
Raashinka halka qoys la siinayo ayaa ka koobnaa gadbad daqiiq ah, gadbad bariis ah, gadbad sonkor ah, kartoon saliid ah iyo kartoon timir ah oo hal qoys loogu talagalay. Halka booyadda biyaha ahina ay ka kooban tahay 10 kun oo litir oo biyo nadiifa oo la cabbi karo ah.
Gargaarkan ay hay'addu u qaybisay dadka abaaruhu waxyeelleen ee deegaannada bariga Somaliland iyo sida oo kale deegaanka Magaalada Mudisho ee Soomaaliya, waxaa maalgelisay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt oo munaasabadda 61 guurada qarannimada dalka Kuweyt ku xustay ololeyaal bani'aadamnimo oo ay ka fulisay 23 dal, kaas oo lagu wado in ay ka faa'iidaysteen illaa 500 oo kun oo muwaadin.
Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC oo munaasabaddan ka hadlay ayaa dalka Kuweyt ku ammaanay kaalinta uu kaga jiro gargaarka la gaadhsiiyo dalalka Saboolka ah ee dunida, gaar ahaan Muslimiinta. Mudane Cabdiraxmaan Mucallimi waxa uu dalka Kuweyt ku ammaanay gargaarkan oo uu tilmaamay in uu yahay mid ay dawladda Kuweyt ku doonayso in maalinta farxaddeeda ay dadka Saboolka ah iyo barakacayaasha ka farxiso, arrintaas oo uu si aad ah uga mahadnaqay. Waxa aanu farxadda maalintaas awgeed tahniyad iyo hambalyo u diray dawladda iyo shacabka dalka Kuweyt.



| goobta | sharaxa | tirada |
|---|---|---|
| burco | salad raashin | 500 |
| | booyad biyo | 10 |
| caynabo | salado raashin | 150 |
| | booyad biyo | 10 |
| laascanood | salado raashin | 250 |
| | booyad biyo | 10 |
| muqdisho | booyad biyo | 250 |



## ARC oo caawimo gaadhsiisay barakacayaal





Hay'adda ARC ayaa Xoolo qalliin ah gaadhsiisay barakayacaal ku dhaqan magaalada Muqdisho ee caasimadda Soomaaliya iyo agoonta lagu daryeelo xarunta Al-amal ee magaalada Garoowe, Puntland.
Hilibkan oo qayb ka ahaa mashruuca dadka Saboolka ah loogu qaybiyo hilibka xoolaha ay dadka samafalayaasha ahi iskaga bixiyaan wanqasha, afaraagudka iwm. waxaa ka faa'idaystay 200 oo qof oo deggen xeerada barakacayaasha ee Garasbaalay.
Sida oo kale, ardayda xarunta waxbarashada samafalka ah ee Al-amal oo tiradoodu boqol tahay ayaa la gaadhsiiyey xoolahan Gawraca ah.
Tallaabadan ayaa qayb ka ah Mashruuc ballaadhan oo ay hay'adda ARC dadka Saboolka ah ugu qaybiso Xoolo qalliin ah. kaas oo ay ka fuliso deegaannada Somaliland iyo Soomaaliya, iyada oo kaalmo ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

## Dhismaha deyrka xarunta Al-Amal ee magaalada Garoowe



Hay'adda ARC ayaa dhammaystirtay dhismaha deyrka ku wareegsan degsiimada Al-Amal ee xarunta waxbarashada samafalka ah ee Al-Amal, taas oo ku taalla magaalada Garoowe ee Puntland.
Dhismaha deyrkan ayaa qayb ka ah dadaalka ay hay'adda ARC ku hirgelinaysa xarumo lagu daryeelo agoonta oo leh deegaan ku habboon waxbarashada iyo noloshada, iyada oo xoojinaysa xaqa uu aadamuhu u leeyahay waxbarashada iyo in uu dugsi helo, gaar ahaan agoonta iyo Ubadka qoysaskoodu Saboolka yihiin.
Xarunta Al-Amal waxa ay agoonta siisaa Kafaalaqaad buuxa oo ay ka mid tahay waxbarashada, xafidsiinta Qur'aanka Kariimka ah, hoy ay seexdaan, iyo in la siiyo daryeel caafimaad oo ay ka helaan rug caafimaad oo xarunta looga dhex dhisay.



## Carruur Loo Sameeyey Qalliino Faruurta Lagaga Baabi'inay

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa magaalada Muqdisho ka fulisay qalliino qurxin ah oo loo sameeyey 10 ka mid ah Carruurta faruuran ee qoysaskoodu danyarta yihiin.
Qalliinnada oo si buuxda u guulaystay, waxa ay qayb ka yihiin mashruuca 'Ololeyaasha caafimaad' ee ay hirgeliso ARC, kuwaas oo dadka sannad kasta ka faa'iidaysta ay ka mid yihiin caruurta ku soo dhasha faruurta.

## ARC Waxa Ay Qodday Ceelal Biyood Oo Ay Ka Faa'idaysteen In Ka Badan 1500 Oo Qof

Hay'adda ARC ayaa ku guulaysatay qodaalka shan ceel biyood oo ku yaalla deegaanno kala duwan oo ka mid ah badhtamaha iyo Koonfurta Soomaaliya.
Ceelashadan oo leh kaabayaal ay ka mid yihiin dararkii ay xooluhu ka cabbayaan iyo wiish gacmeed biyaha lagaga soo saarayo, waxaa laga qoday deegaanno ka mid ah magaalooyinka Baladweyne iyo Kismaayo. Waxaa aana loogu talagalay in ay daboolaan baahiyaha biyood ee dadka deegaannadaas oomanaha ah, gaar ahaan xilliyada jiilaalka ee ay biyuhu yaraadaan.
Ceelal biyoodkan oo ay ka faa'iidaysanayaan in ka badan 250 qoys oo celcelcelis ahaan wadartoodu noqonayso 1500 oo qof, waxa aanay yihiin sida ka muuqata shaxdan hoose:



| NO | Magaca Ceelka | Deegaanka | ka faaidaystayasha |
|---|---|---|---|
| 1 | Ceelka Marxuumad Fawsiya Yuusuf Cabdalqafuur | Baladweyne | 50 Qoys |
| 2 | Ceelka Marxuumad Jawhara Muxamed Almadiiri | Kismaayo | 50 qoys |
| 3 | Ceelka Muxamed Saalix Almadiiri | Kismaayo | 50 qoys |
| 4 | Ceel ka mid ah ceelashada mashruuca durdurrada Al-khayr 30 | Baladweyne | 50 qoys |
| 5 | Ceelka Muudi Almudawac | Baladweyne | 50 qoys |



## Guddida kormeerka oo kulan ka yeeshay qandaraaska dhismaha cisbitaalka Caalamiga ah



Guddida loo xilsaaray kormeerka iyo la socoshada qandaraaska dhismaha cusub ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Harggeysa, ayaa yeeshay kulan ay ku gorfaynayaan qandaraaska dhismaha cusub ee cisbitaalka. Guddida ayaa kulankooda oo ka qabsoomay xarunta hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC, waxa ay daraasayn iyo dib u eegis ku sameeyeen warbixinaha laga sameeyey daraasaddii, gorfayntii, baadhistii iyo kormeerkii hore loogu sameeyey shirkadaha soo xaraystay arjiyada codsiga qandaraaska dhismaha cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa. Waxa kale oo ay guddidu qiimayn iyo dib u eegis ku samaysay warbixinihii iyo tallaabooyinkii la xidhiidhay cisbitaalka dhismihiisa ee tan iyo bilowgii la qaaday. Kulankan waxaa qayb ka ahaa golaha agaasinka, guddida qandaraasyada ee hay'adda gargaarka Afrika iyo guddida baadhista iyo kormeerka goobta.

## ARC Waxa Ay Ka Qaybgashay Kulanka Heer Qaran Ee Gurmadka Abaaraha



Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa mid ka mid ah qoysaska Saboolka ah ee degmada Jowhar ee caasimadda dawladgobaleedka Hirshabeelle waxa ay ku wareejisay hal neef oo lo' rimaan ah, kaas oo laga bixiyey samafale Marxuum Daariq Salaax. Deeqdan oo uu qoyskan gaadhsiiyey xafiiska hay'adda ARC ee magaalada Muqdisho, waxa ay qayb ka ahayd mashruuca 'Xoogsi Xalaal ah' oo loogu talagalay in qofka ama qoyska la siiyo meel uu isagu kala soo baxo noloshiisa. waxaana ka faa'iidaynsan doona 3 qof oo uu ka kooban yahay xubnaha qoyskan.

## Ardayda Kuweytiga oo salaad roob doon ah tukaday



300 oo arday oo ka tirsan dugsiyada hoose / dhexe ee xarunta Kuweytiga, macallimiintooda iyo hawlwadeennada kale ee dugsiyada ayaa salaad roobdoon ah ku tukaday xarunta dugsiga. Waxa ay Alle ka baryeen in uu muwaadiniinta iyo guudahaan umadda Soomaaliyeed ka soo jebiyo abaaraha, naxariistiisana soo gaadhsiiyo dad iyo duunyaba.

Xilligan waxaa deegaanno kala duwan oo Somaliland ka mid ah ka jira abaaro sababay biyo yaraan, oo waxyeelleeyey dadka iyo Xoolaha gaar ahaan goballada bariga.

## Wasiirrada Cadaaladda Iyo Dastuurka Ayaa Soo Booqday Xarunta ARC



Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika, mudane Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa xarunta hay'adda ku soo dhoweeyey wafti ka tirsan golaha xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland.
Waftigan oo ka koobnaa wasiirka dastuurka iyo Arrimaha baarlamaanka, mudan Maxamid Xaaji Aadan Cilmi iyo wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha garsoorka mudane Saleebaan Warsame Guuleed ayaa ay guddoomiyaha Mucallimi ka wada hadleen arrimaha ay ka mid yihiin hannaanka gurmad degdeg ah lagu gaadhsiin karo barakacayaasha iyo dadka ay dhibaatadu ka soo gaadhay abaaraha ka jira deegaanno kala duwan oo Somaliland ah.
Labada dhinac waxa ay isla qaateen tallaabooyin dhawr ah oo ololeyaal gargaar lagu gaadhsiinayo qaar ka mid ah deegaannada Somaliland.
Kulankan waxaa isaguna goobjoog ka ahaa madaxa waaxda mashaariicda iyo Barnaamijyada iyo madaxa xidhiidhada dadweynaha ee hay'adda Gargaarka Afrika (ARC).

## Xarunta Kuweytiga oo dalka Kuweyt la damaashaaday maalinta qarannimadiisa



Ku dhowaad 500 oo ka mid ah ardayda heerarka kala duwan ee dugsiyada xarunta waxbarashada ee Kuweyt, ayaa xarunta ku qabtay munaasabad ay farxad kula damaashaadayaan shacabka iyo dawladda dalka Kuweyt, munaasabadda sanand guurada 61naad ee maalinta qarannimadooda.Ardaydan oo isugu jirtay wiilal iyo gabdho ayaa iyaga oo lulaya calamada Kuweyt iyo Somaliland, waxa ay munaasabaddan ku xuseen heeso, ciyaaro iyo hal-ku-dhegyo kala duwan oo ay ku maamusayaan maalintaas. Taas oo ay ku muujinayeen sida ay farxadda iyo badhaadhaha ula qaybsanayaan dawladda Kuweyt oo sabab u ahayd jiritaanka xarunta samafalka ee Alkuweyt oo maanta lagu tiriyo xarunta ugu weyn ee nooceeda ka jirta Somaliland.Ardaydan ayaa tahniyad iyo duco u diray shacabka iyo dawladda Kuweyt, iyaga oo ka tahniyadeeyey sannad guulo iyo horusocodka ahaa ee ay ka soo gudubtay, una rajeeyeen ammaan, horumar iyo bashbash ay ku sii waarto.
Dalka Kuweyt ayaa sannad kasta 25 ka Feebarweri u dabbaaldega maalinta qarannimada oo 61 jirsatay.

## Arday ka tirsan Kuweytiga oo helay ijaasada Qur'aanka iyo abaal marin



Cabdiladiif Faysal oo ka mid ah ardayda Barashada Qur'aanka Kariimka ah ee mashruuca Shafiic, xarunta waxbarashada ee Kuweytiga ayaa ku guulaystay shahaadada Caalamiga ah ee ijaasada Qur'aanka iyo abaalmarin lagu maamuusay kaalinta uu ka galay tartanka Qur'aanka. Ardaygan oo markii uu Qur'aanka ka dhammaystay xarunta Kuweytiga u wareegay xarunta Barashada Qur'aanka Kariimka ah ee Aflax oo ku taalla magaalada Hargeysa, waxa uu ijaasada ku qaatay akhriska Qur'aanka ee tebinta 'Xafsa Can Caasim'. Cabdiladiif waxa uu ka mid ahaa 348 arday wiilal iyo gabdho isugu jiray oo ka qaybgalay tartan loo galay helitaanka Ijaasada, waxa aanu ku guulaystay kaalinta koowaad. Sidaas awgeed waxa uu mutaystay abaalmarin gaadhi ah oo ay bixisay shirkadda isgaadhsiinta ee TELESOM iyo shahaadada Ijaasada.

Ijaasada waxaa lagu kasbadaa imtixaan ardayga laga eegayo xiftigiisa iyo saxnaanshiyaha carrabkiisa iyo in ay u dhammaystiran yihiin axkaamta hab-akhriska Qur'aanka Kariimka ah. waxa aanay leedahay muhiimad ah in qofku uu abtirsiin u lahaado cidda u sii deysay carrabka ama sugtay saxnaanshiiyaha qur'aankiisa, taas oo taxan illaa Nebi Muxamed (SCW).

Rasuulkii Alle (SCW) waxa uu xadiis ku sheegay in 'Allaah' uu leeyahay 'Ehel' dadka ka mid ah. Markii asxaabtu weydiisay cidda uu ehelkaasi yahayna waxa uu sheegay in ay yihiin 'dadka ehelka ka dhigta Qur'aanka Kariimka ah. kuwaas ayaa ah ehelkiisa iyo kuwa uu ku mannaysto naxariistiisa iyo daryeelkiisa. Mashruuca Shafiic oo ay fuliso hay'adda Gargaarka Afrika waxaa maalgelisa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

## Tababar La Siiyey Beeraleyda Degmada Ceerigaabo Ee Jamhuuriyadda Somaliland



Hay'adda gargaarka Afrika ee ARC oo kaashanaysa hay'adda NRC ee dalka Norway mashruuceeda Somaliland ayaa Tababar siisay beeraleyda magaalada Ceerigaabo ee gobalka Sanaag. Mashruucan tababarka beeraleyda oo ay ka faa'iidaysteen 15 qof oo beeraley ahi, waxa uu qayb ka yahay dadaal ay hay'adaha bulshada rayidka ahi ku doonayaan, in qoysaska Saboolka ah laga saaro xaaladda ku tiirsanaanta ah. Si loo gaadhsiiyo heer ay waxsoosaar yeeshaan, noloshoodana ka adkaan karaan. Sida oo kalana bulshadooda u faa'idayn karaan. Waxaa tababartayaasha la siiyey duruus la xidhiidha baahiyaha aasaasiga u ah beerashada iyo waxyaabaha aanay ka maarmin. Waxa aana lagu tababaray loona diyaariyey xirfadda wax beerasho si ay iyagu isugu tiirsanaadaan.



AFRICAN RELIEF COMMITTEE

A.R.C

لجنة أفريقيا للإغاثة

AFRICAN RELIEF COMMITTEE

أثــرٌ .. يبقى

@africanreliefco

مسارات خيرية

CHARITABLE PATHS